

Covid-19

TALOOPYIN KU WAJAHAN SHAKHSIYAADKA AQALLADOODA LAGU XAREYSIIYAY (KARANTIIMAY) IYO DADKA KA AG DHOW DHOW

TALOOPYINKA KU WAJAHAN DADKA XANUUNSAN

MAAD XANUUNSAN TAHAY ? HADDABA BADBAADI DADKA KAA AG DHOW DHOW



Si joogto ah intiiba aad kartid gacmahaaga biyo iyo saabuun ugu dhaq. Dhaq mar walba oo aad hindhisto, qufacdo ama aad sanko iska siimiso (nadiifiso)



Mar walba adeegso fasaleetiga xaashida (tiishka). Safaleetigana waxaa la isticmaalaa mar qur ah ka dibna waa in lagu tuuraa bacda qashinka ama bar qashin oo daboolmaysa ama xirmaysa



Marka aad qufacayso ama hindhisayso, **afka saaro safaleeti** ama maro ama gacantaada oo soo laaban barta suxulka ku aaddan afka saaro



Aqalkaaga joog oo isku go'doomi keligaa intiiba suurto-gal kuu ah : ehelkaaga xitaa ka go'sanoow, markaad hurdeyso xitaa keligaa. Ha ogolaanin booqashooyinka aan lama huraanka ahayn. Taabshada jirka dadka kalana aad u koob. Iskuul ha aadin iyo shaqo toona iyo goobaha bulsahada

U FIIRSO CALAAMADAHA CUDURKA KU HAYA

Haddii calaamadaha cudurka ay kasii daraan (tusaale ahaan : neefta oo kugu dhegta, qandho aad u kulul), dhakhtarkaaga wac. Haddii ay noqoto in isbitaalka aad aadidna, taleefan u dir marka hore soo dhaweynta isbitaalka oo u sheeg in uu ku hayo xanuunka Koronafeyres (Covid-19). Isbitaalku wuxuu isu diyaarinayaa qaab uusan cudurka dadka kale ugu faafi karin

WIXII INFORMESHIN AMA MACLUUMAAD AH WAXAAD KA HELEEYSAA

www.info-coronavirus.be

0800/14 689



Covid-19

TALOOPYIN KU WAJAHAN SHAKHSIYAADKA AQALLADOODA LAGU XAREYSIIYAY (KARANTIIMAY) IYO DADKA KA AG DHOW DHOW

TALOOPYINKA KU WAJAHAN DADKA KA AG DHOW DHOW SHAKHSIYAADKA XANUUNSAN

- ✓ Iska ilaali intaad awooddid taabashada jirkaaga jirka qofka xanuunsan. Haddii ay suurto-gal tahay, hal ruux keliya wax ha u qabto ruuxa xanuunsan.
- ✓ Yeysan dhicin in ruux qaba xanuun dhanka neefsashada ah, ama ruux jirkiisa uu ka liito dhanka iska difaacista cudurrada, ama dadka da'da ah, iney wax u qabtaan qofka xanuunsan.
- ✓ Hawo siiya (layriya) qolalka lagu nool yahay : maalinkii dhawr jeer fura daaqadaha qolka uu ku sugan yahay qofka xanuunsan, mar walbana muddo 30 daqiiqadood ah ha furnaadaan daaqadaha.
- ✓ Si joogto ah u dhaq gacmahaaga, iskana ilaali in gacmo aanan dhaqneyn aad ku taabatid indhahaaga, sanakaaga ama afkaaga.
- ✓ Iska ilaali in aad la wadaagto qofka xanuunsan, maacuunta, shukumaannada iyo gogosha waxyaabaha la saarto. Ruux walbana cunnadiisa gooni ha u cuno.
- ✓ Waxaad maalinkiiba mar nadiifisaa goobaha sida (miisaska, koomadiinka ama miiska yar, barta gaanjada birta albaabka lagu soo jiido, halka suuliga lagaga fariisto) adiga oo adeegsanaya biyo l agu biiriyey warankiilo 1%. (Hal qaaddo oo warankiilo ah ku dar hal litir oo biyo ah).

Muddada ay soconayaan tallaabooyinkan waxaa lagala hadlayaa dhakhtarka laakin waxaa lagu dhaqmayaa tallaabooyinkan ugu yaraan ilaa iyo inta calaamdaha cudurka ay ka baaba'ayaan.

WIXII INFORMESHIN AMA MACLUUMAAD AH WAXAAD KA HELEEYSAA

www.info-coronavirus.be

0800/14 689

